




Adeegyada Isku-dhafan iyo Taageerada

Dadku waxay u baahan yihiin taageero si ay ugu noolaadaan nolol wanaagsan. Adeegsiga taageerada ilo badan oo kala duwan ayaa ka caawiya abuurista nolol buuxda, oo loo dhan yahay oo aan ku xad-didnayn, ama lagu qeexay adeegyada lacagta ah. U adeegso foomkan si aad u aqoonsato ilaha taageerada iyo awoodaha shaqsiyeed si aad u gaarto yool cayiman ama aragti weyn.

Hadafkeeyga: _____



Ogeysiinta Qoysaska
Maanta iyo Berri

Informing Families waa iskaashi ka dhexeeya Golaha Naafada Koritaanka ee Gobolka Washington (DDC), Maamulka Naafada Koritaanka (DDA) iyo la-hawlgalayaasha kale ee gobolka oo dhan. Waxaan bixinnaa warar lagu kalsoonaan karo iyo macluumaad kaasoo awood siiya shaqsiyaadka iyo qoysaska inay si firfircoon uga qeybqaataan qorshaynta iyo abuurista fursado lagu noolaado nolol buuxda, oo loo wada dhan yahay. Is-qor halkan: www.informingfamilies.org/news.



DDA: Abaabka adeegyada naafada

Albaabka ugu weyn ee adeegyada shaqsiyaadka qaba naafonimada garaadka / koriinka ee gobolkeena waa Maamulka Naafada Korriinka (DDA). Waa meesha dadku u tagaan si ay caawinaad uga helaan guriga, dibedda, iyo adeegyada ku saleysan bulshada. Waxbadan ka baro adeegyada DDA halkan: dshs.wa.gov/dda.

Muhiim: Adeegyada badankood iska hel maaha, taas oo micnaheedu yahay in uqalmitaanka DDA ma ahan mid si toos ah u horseedda helitaanka adeegyada. Sugitaan dheer ayaa jiri kara, laakiin waxaa muhiim ah in la qaado tillaabada koowaad, taas oo lagu dalbanayo go'aaminta u-qalmitaanka DDA.



3 walxood oo aad u baahantahay in ka aad ogaato codsashada ogaanta u qalmashada Adeegyada Naafada Koritaanka

#1 Si aad u codsato u qalmitaanka DDA, waxaad u baahntahay:

In aad deegaan ku tahay gobalka.

- Hadii aysan DDA kuu aqoonsan in aad deegaan tahay, codsigaaga waa joojiyaa
- Hadii aad ku nooshahay global kale, u qalmitaankaaga adeeg ma soo wareegayo

Iyo



Waa na in aad yeelataa xaalad u qalmitaan.

Shuruudaha u qalmidda ee DDA ee daahitaanka korniinka iyo naafonimada garaadka / naafada korniinka ayaa loo isticmaalaa in lagu go'aamiyo u-qalmitaanka. Waxaad ka heli kartaa halkaan: dshs.wa.gov/dda (dhagsiiXaq u lahaanshaha).



#2 Sida loo codsado go'aaminta u-qalmitaanka DDA ee da 'kala duwan:

Dhalasho ilaa saddex sano

Codso Taageerada Hore ee loogu talagalay Dhallaanka iyo socod-baradka (ESIT). Isku-duwaha Kheyraadka Qoyska (FRC) ayaa kaa caawin doona inaad hesho baaritaanno, adeegyo iyo taageerooyin. Booqo: dcyf.wa.gov/services.

Talo siin

DDA waxay u baahan tahay dib-u-go'aaminta u-qalmitaanka markay da'da 4 tahay, marka waxaad u baahan doontaa inaad dib-u-dalbato adeegyada DDA ka hor in-taysan dhicin. DDA waxay soo diri doontaa ogeysiis 6 bilood ka hor intuusan ilmahaagu gaarin 4 sano.



Saddex jir iyo ka sii weeyn

Ka codso go'aaminta u-qalmitaanka xafiiska DDA-ga deegaankaaga (ama khadka tooska ah). Soo hel xafiiska kuugu dhow: dshs.wa.gov/dda.

Waxaa lagu weydiin doonaa dukumentiyiyo si loo xaqiijiyo aqoonsiga, degenaanshaha, naafanimada, ogolaanshaha, iyo (meeshii looga baahdo) haynta ama diiwaanada korsashada.

Booqo dshs.wa.gov/dda si aad u hesho xirmada arjiga (dhagsii U-banaanaanta).

#3 Adiga ayay ku jirtaa inaad codsatid in lagu qiimeeyo adeegyada.

Waa inaad soo wacdaa si aad u codsa-tid adeegyada ka dib marka lagu go'aansado inaad u qalanto DDA. Adeegyada qaarkood waxay xaq u lee-yihiin, sida daryeelka shakhsi ahaaneed ee loo maro Dookha Koowaad ee Bulshada; si kastaba ha ahaatee, inta badan adeegyada DDA waxaa lagu bi-xiyaa barnaamijka ruqsada, taasma aha xaq u lahaansho.



Isqorista barnaami-jyada ruqsada ah waxaa lagu buuxiyaa iyadoo lagu saleynayo baahida la qiimeeyay markii ay jiraan maalgelin la heli karo. Mar alla markii lagu diwaanga-liyo adeegyada, waxaa lagugu qorayaa maamule kays oo qorshe adeeg ayaa bilaaban doona. Aad ayey muhiim u tahay inaad codsato adeegyada aad u baahan tahay, si laguula soo xiriiri karo marka ay furan tahay barnaamijkaas ama adeeggaas.

Isku Abaabul Nolosha



Iyadoo aan loo eegin da'da wiilkaaga / gabadhaada, waxaa macquul ah, waxaad u baahan doontaa inaad dalbato adeegyada, dheefaha ama isqorista barnaamij inta lagu jiro heerar badan oo nolosha ah. Waqti uun badbaadi oo bilow inaad siiso dhammaan dukumiintiyadaada muhiimka ah guri wanaagsan si aad u hesho waxaad u baahan tahay markii aad u baahatid.

Waa kuwan siyaabo fudud oo aad u keeydsan karto dukimintayadaada:

- Sanduuqa faylka qiimaha jaban.** Dukaammada badankood waxay leeyihiin agabyo abaabul badan oo madadaalo ah. Iibso galka jeldi ama sanduuq la qaadan karo oo ay ku jiraan feylal ware midab ka soo dhex muuqda walxaha kale — waana wax sahlan in la arko
- Thumb drive.** Adeegyo badan ayaa leh codsiyo khadka ah si loo go'aamiyo u-qalmitaanka. Iskaanka iyo ku dejinta feylasha aalada thumb drive waxay sahal ka dhigaysaa in la geliyo dukumentiyada lagama maarmaanka ah. Sidoo kale waa hab wanaagsan oo lagu kaydinayo feylasha waraaqahaaga lagana qaato haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah.

Dikumiintayada aalaaba la codsado

Aqoonsi

Shahaadada dhalashada, Kaarka Amaanka Bulshada, Aqoonsiga sawirka iyo caddeynta deganaanshaha Gobolka Washington (tusaale ahaan, biilasha adeegga, diiwaangelinta cod bixiyaha).

Ogolaanshooyin

Adeegyo badan ayaa u adeegsada u-qalmitaanka barnaamij kale go'aan qaadashada, sidaa darteed iska hubi inaad haysato dhammaan waraaqaha oggolaanshaha, laakiin gaar ahaan kuwa ka socda SSI, DDA, Apple Health, iyo barnaamij kasta oo guryeynta ka caawiya.

Qiimeeyno

Caafimaadka, cilmi nafsiga, qiimeynta waxbarashada iyo qiimeynta tilmaamaysa naafada iyo / ama baahida naafonimada la xiriirta ee adeegyada / daaweynta.

Cudur-ku-sheeg

Caddaynta naafanimada ayaa loo baahan yahay marka la codsanayo kaalmada iyo adeegyada la xiriira naafonimada dhammaan qaybaha nolosha: waxbarashada, caafimaadka, guryeynta, shaqada, taageerada guryaha iyo bulshada, maganta baahiyaha gaarka ah, iyo barnaamijyada aadan xitaa ogaan karin inay jiraan illaa wiilkaaga / gabadhaada ubaahantahay.

Waxbarasho

Natijada cilmi-nafsiga iyo natiijooyinka ka imanaya dhakhaatiirtacilmi-nafsiga iskuulka, qoraalada dugsiga, iyo sidoo kale diiwaanka dhacdooyinka la xiriira dugsiga ama dabeecadaha. Hayso nuqulada dhammaan IEP-yada, oo waydii dugsiga ilmahaaga nuqul ka mid ah faylka buuxa ee dugsiga dhammaadka sannadka (ama wakhti kasta, runtii).

Xisaabaadka

Macaashka iyo adeegyada badankood waxay leeyihiin qayb u qalmitaan maaliyadeed. Haddii ilmahaagu ka yar yahay 18, hayso nuqullada xisaab celinta sanadkii hore, iyo sidoo kale liistada ilaha iyo hantida. Haddii xubin qoyskaaga ka mid ah yahay 18 ama ka weyn yahay, kaliya dakhligiisa / keeda iyo kheyraadkiisa ayaa la xisaabinayaa; Hayso jeegagga bil kasta ee bixinta wargelinta SSI.

Sharciyadda

Waraaqaha Masruufka, Wakiilka bixinta, Awooda Qareenka ee Caafimaadka iyo / ama Maaliyaddu, iyo sidoo kale Waraaqda Damaca oo sheegaya waxa aad jeceshahay xubin ka tirsan qoyskaaga.

Caafimaadka

Dukumiintiyada caymiska caafimaadka; natiijooyinka baaritaanka; daawo; daaweynta, talaalada; booqashada ilkaha / dhakhtarkii ugu dambeeyay; iyo macluumaadka lagala xiriirayo dhammaan xirfadlayaasha daryeelka caafimaad.

Qorshe haawl

Laga soo bilaabo qorshayaasha adeegga ee ku saleysan shakhsiyadka ilaa IEPs iyo himilooyinka nolosha ee muddada-dheer, dukumiintiyada qorsheynta waa qeyb muhiim ah oo lagu hubinayo in qof walbaa uu ku shaqeynayo hadafyada shaqsiga iyo qoyska. Xaaladaha qaarkood, sida waajibaadka masruufka, lahaanshaha qorshe dukumeentiyo daryeel ayaa loo baahan yahay.

Maganta

Macluumaadka maganta baahiyada qaaska ah, keydadka iyo xisaabaadka.

Fahmitaanka Adeegyada DDA: Ruqsadaha iyo Community First Choice

Ku dhowaad dhammaan adeegyada lagu bixiyo Maamulka Koriinka Naafada (DDA) waxaa lasoo mariyaa ka-dhaafidda Adeegyada Kusaleeysan Hoyga iyo Bulshada (HCBS) ee federaalka. Waxaa looga wacaa kadhaafid sababtoo ah waxay ka dhaafayaan xulashada in adeega lagu siiyo xarun hay'ad badalkeed ay ku helaan adeeg la mid ah gurigooda iyo bulshadooda. DDA waxay leedahay shan ka dhaafid oo kala duwan, mid walbo leh adeegyo u gaar ah iyo xadka maalgelinta.



Adeegyada shaqsiya iyo Qoyska (IFS)

Ciyaalka iyo dadka waaweyn ee kunool guriga qoyska. Adeegyada waxaa kamid ah: baxnaaninta khaaska ah, ka qayb qaadashada Bulshada, farsamada caawinta, Nasiino, Caawin xirfadeeysan (21 sanno jir iyo ka weyn),

Qiimaynta Halista, Adeegyada Xasilinta, Daweynta la qabsiga, La qabsashada deegaanka, Wax ka beddelka gawaarida, Qalabka howlaha khaaska ah loogu talagalay/agab, PT/OT/Hadalka/maqalka iyo luuqadda (21 sanno jir ama ka weyn), La tashiga Shaqaalaha/Qoyska, Taageerada dhaqanka wanaagsan, (21 sanno ka yar), Latalin ka imaanaysa dadka facaaga ah iyo Fududeynta qorshaynta qofka u gaarka ah. Heerarka maalgelinta sanadkiiba waxay ku salaysan yihiin baahida la qiimeeyay: \$1200, \$1,800, \$2,400, \$3,600.



Basic Plus

Waxaa loogu talagalay ciyaalka iyo dadka waaweyn ee kunool hoyga qoyska ama bulshada dhexdeeda awooddooda ay ku sii wadi karto taageerida goobtaas ay halis ku jirto haddii aanan loo helin adeegyo dheeraad ah. Baxnaaninta

khaaska ah, Ka qayb qaadashada Bulshada, ka mid noqoshada bulshada, Nasiino, Caawin xirfadeeysan (21 sanno iyo dadka ka weyn), Qiimaynta halista, Adeegyada xasilinta, Daweynta la qabsiga, La qabsiga deegaanka, Qalabka howlaha khaaska ah loogu talagalay/agab, PT/OT/Hadalka/maqalka iyo adeegyada lluuqadda (21 sanno iyo dadka ka weyn), La tashiga shaqaalaha/Qoyska, Taagerada Dhaqanka Wanaagsan, (21 sanno iyo ka yar), Shaqo ka taageerid.



CORE

Ciyaalka iyo dadka waaweyn halista dhow ugu jiro meelaynta guriga ka baxsan kuwasoo leh baahi aysan dabooli Karin Basic Plus Waiver, lagana yaabo in ay u baahan yihiin 24 saac adeega guriga kuwaasoo ay

ku jiraan tababar iyo waxbarasho; ama, kuwaas oo u baahan kara maalin kastaa ilaa toddobaad kasta taageero shaqsiyeed jir ahaan ama caafimaad ahaan. Adeegyada waxaa kujiro dhammaan adeegyada hoos imaada Basic Plus*, iyo sidoo kale taageerid nolosha iyo adeegyada xilliga kala guur bulshada. (Adeegyada *CORE Waiver, waxay bixiyaan maalgelin adeegyo ka badan adeegyada Basic Plus, oo ku saleysan baahida la qiimeeyay.)



Taageero Dabecada Guriga Dhexdiisa ah ee Caruurta (CIIBS)

Ciyaalka da'adooda u dhaxayso (8-20) ee kunool guriga qoyska ee halista ugu jiro meelaynta guriga meel ka baxsan sababtoo ba'anaanshaha caqabadaha dhaqankooda. Adeegyadu waxay ku saleysan yihiin

taageerida dhaqanka wanaagsan iyo qorshe kooxeed ku saleysan xoojinta iyo ka shaqeynta natiijooyinka ay soo jeediyeen qoyska. Ilma walbo kooxdiisa waxaa ka mid ah: qoyska, saaxiibo, daryeel bixiyaal, shaqaalaha iskuulka, iyo kuwo kale. Adeegyada waxaa ka mid ah: Nasiino, Farsamada nolosha, Qiimaynta halista, Adeegyada xasilinta, Dharka khaaska ah, Muusigga, iyo Daweynta dhaqdhaqaaqa, daweynta la qabsiga, Wax ka beddelidda gawaarida, iyo Qalabka howlaha khaaska ah loogu talagalay/agab.



Community Protection

Waxaa loogu talagalay dadka waaweyn ee baahan 24 saac kor jooga shaqaale kormeera iyo daweyn si ay u ilaaliyaan nabadgelyadooda iyo tan bulshada. Ujeedada barnaamijka Ilaalinta Bulshada waa in la siiyo jawi

habeysan, Jawi lagu dawoobi karo oo loogu talagalay dadka qabo baahida ilaalinta bulshada si ay ugu noolaadaan si nabadgelyo leh oo guul leh bulshada dhexdeeda iyadoo la yareynayo halista nabadgelyada bulshada. Adeega Ilaalinta Bulshada waxaa ku jira dhammaan adeegyada hoos imaada CORE Waiver, marka laga reebo: Ka qayb galka bulshada, Nasiinada, Waxbarashada kusaabsan nolol wanaaga, iyo Ka mid noqoshada bulshada.

Kordhinta madaxbanaanida: Community First Choice

Community First Choice (CFC) waa barnaamij ruqsad lahayn oo ay bixiso DDA



kaas oo ku dadaala in uu ka caawi carruurta iyo dadka waaweyn inay u madaxbannaanaadaan intii suurogalka ah inta ay guriga ku nool yihiin. CFC waa xuquuq la leeyahay. Tan macnaheedu waa haddii uu qof la kulmo dhaqaalihii iyo u qalmitaanka CFC, wuu heli karaa.

Adeegyada CFS waxaa ka mid ah

Caawimada Daryeelka Shakhsi ahaaneed ee howlaha maalinaha ah, sida qubeyska, dharka labiska, diyaarinta cuntada iyo dukaameysiga lagama maarmaanka u ah.

Teknolojiyada Caawinta si looga caawiyo shakhsiyaadka si ay ugu madaxbannaanaadaan howlaha maalinaha ah.

Tababbarka Aqoonta xirfadaha helida nolol maalmeedka sida karinta, howlaha guri ku haynta ama daryeelka timaha.

Nidaamyada Waxqabadka Degdegga ee Shaqsiyeed (PERS), waa aalad elektroonik ah oo kuu oggolaaneysa inaad u wacdid kaalmo markay jirto xaalad degdeg ah.

Wac Codsiga Adeegga 'DDA' & Khadka Macluumaadka si aad wax dheeraad ah uga ogaato ruqsada iyo Xulashada Koowaad ee Bulshada.

Region 1

Spokane: 800-319-7116
Yakima: 866-715-3646

Region 2

Seattle: 800-974-4428
Everett: 800-567-5582

Region 3

Tacoma: 800-735-6740
Olympia: 888-707-1202

